# Qaraarka
# Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka
# Dastuurka KMG

## Qodobka 1aad:
## Xilka iyo Awoodaha Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka

**1.** Ka doodista, wax-ka-bedelidda iyo ansixinta Dastuurka KMG waxaa awood u leh Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qodobada 63, 71 iyo 136 ee Dastuurka KMG ah.

**2.** Si waafaqsan Qod.133(8) ee Dastuurka Federaalka KMG ah, Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka wuxuu u xilsaaran yahay:

(a) Diyaarinta soojeedimaha dib u eegista iyo wax ka bedelidda Dastuurka iyo warbixinnada la xiriira si waafaqsan Qod. 134(7)(b) iyo sharciga lagu ansixinaayo Dastuurka;

(b) Inuu dadweynaha ku wargaliyo soo jeedimaha iyo warbixinnada la xiriira, siiyana fursado ku filan inta suurtagal ah dhageysiga dadweynaha si waafaqsan Qod.133(8)(b) iyo (c) ee Dastuurka KMG ah;

(c) Inuu la tashado xubnaha Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qod.133(8)(d);

(d) Inuu howlgeliyo Golayaasha sharci-dejinta Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, soona gudbiyaan aragtidooda marka la isla meel dhigana lagu daro soojeedimaha wax ka bedelka si waafaqsan Qod.133(8)(e).

**3.** Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka, kadib marka uu soo gabagabeeyo howlgallada ku xusan Faqrada 1aad ee Qodobkan, wuxuu hindise sharciyeedka soojeedimaha wax ka bedelka Dastuurka iyo warbixinnada la socda u gudbinayaa Guddoonka Labada Aqal ee BFS si ay uga gutaan waajibaadkooda.

## Qodobka 2aad:
## Kulamada Wadajirka BFS ee Gaarka ah

1. Guntanka kulamada wadajirka laba aqal ee gaarka ah wuxuu ku qabsoomayaa in ay goobjoog yihiin boqolkiiba kontan iyo hal dheeri ah (50%+1) tirada guud ee aqal kasta BFS si waafaqsan Q.27(1) Xeer hoosaadka Aqalka Sare & Q.24(1) Xeer hoosaadka Golaha Shacabka.
2. Guddomiyaha Golaha Shacabka iyo Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS waxay kulan wada jir ah la yeelanayaan Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka si ay isula meel dhigaan una soo saaraan shintiris waqtiyeysan oo ku saabsan kulamada wadajirka u gaarka ah ka doodista iyo ansixinta hindise sharciyeedka soojeedimaha wax ka bedelka Dastuurka.
3. Shintiriska mideysan waa in uu si cad u tilmaamaa:

   (a) Qorshe-howleedyada ay fulinayaan Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka, Guddiga Madaxa bannaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo howlaha kale ee ay qabanayaan hey'adaha dowladda ee ku xusan Qod. 3aad ee habraacan.

   (b) Diyaarinta iyo muddeynta arrimaha u baahan wada-xaajoodka siyaasadeed, si ay ugu gudbiyaan Golaha Wadatashiga Qaranka, go'aanadoodana ula wadaagaan Guddiga Madaxa bannaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka si ay ugu soo diyaariyaan hab qoraal qaanuuneed.
4. Inta ay socdaan kulamada wadjirka u gaarka ah ka doodista iyo ansixinta soojeedimaha Dastuurka, Shir-guddomiyaha kulamada wadajirka ah ma yeelanayo cod aan ka aheyn marka codadku ay bar-bar dhac noqdaan si waafaqsan Q.28(3.b), Q.71(2) ee xeer-hoosaadka Aqalka Sare & Q.31(4) Xeer hoosaadka Golaha Shacabka..

5. Kulamada wadajirka u gaarka ah ka doodista iyo ansixinta soojeedimaha wax ka bedelka Dastuurka waxaa la raacayaa habraacaan iyo Cutubka 15aad ee Dastuurka KMG ah.

**Qodobka 3aad:**
**Soojeedinta Wax-ka-beddelka**

1. Guddiga Madaxa bannaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka wuxuu hadba Cutubyada Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurku u xilsaaro kasoo diyaarinayaa qabyo-qoraalka dib-u-eegista Dastuurka oo siiqaysan iyo warbixinta la socota kuna soo celinayaa Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka;
2. Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka kadib markuu ka baaraandego iskuna raaco soojeedimaha Guddiga Madaxa bannaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka wuxuu:
   (a) **Marxaladda kowaad** warbixintiisa dib u eegista Dastuurka u gudbinayaa Guddoonka Labada Gole ee BFS loona qaybinayaa kulanka wadajirka u gaarka ah dib-u-eegista Dastuurka iyadoo aysan jirin wax dood ah oo ku saabsan nuxurka soojeedimaha wax-ka-baddelka aan ka ahayn codsi caddeymo iyo weydiimo la xiriira arrimaha ku xusan faqradda (b) ee qodobkaan.
   (b) Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurku wuxuu marxaladda kowaad warbixintiisa diiradda ku saarayaa:
      (i) Ujeedooyinka sharciga qabyo qoraalka iyo hadafka uu gaaristooda higsanaayo;
      (ii) Waafaqsanaanta Dastuurka soojeedimaha wax ka bedelka;
      (iii) Qorshe howleedyada Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka u toog hayo fulintooda;
3. Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka iyagoo kaashanaya Guddoonka Labada Gole BFS waxay xafiisyada/hay'adaha hoos ku xusan u gudbinayaan qoraal iyagoo ka codsanaya in ay aragtiyadooda qoraal ugu soo gudbiyaan Guddiga muddo aan ka badneyn 30 maalmood;
   i. Madaxtooyada JFS;
   ii. Xukuumada JFS.
   iii. Maxkamadda Sare,
   iv. Maxkamadda Dastuurka,
   v. Xukuumadaha Dowlad Goboleedyada;
   vi. Golayaasha Wakiilada Dowlad Goboleedyada
   vii. Maamulka Gobolka Banaadir
   viii. Maamulka SSC-Khaatumo
   ix. Culimada Soomaaliyeed
   x. Bulshada rayidka ah iyo khubaro kasta oo takhasus gaar ah leh.
4. Aragtida hay'addaha ku xusan faqradda 3aad ee Qodobkan oo lagu dhafay fiirooyinka Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka, waxaa loo xilsaarayaa Guddiga Madaxa bannaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka si ay usoo qodobeeyaan una siiqeeyaan soojeedimahaas si waafaqsan Qod. 133aad ee Dastuurka KMG muddo aan ka badneen 30 maalmood.
5. Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka marka uu helo kana soo baaraandego qodobada ay soo gudbiyeen Guddiga Madaxa bannaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, wuxuu diyaarinayaa warbixinta dib u eegista Dastuurka oo ay ku lifaaqantahay soojeedimaha wax-ka-bedelka Dastuurka una gudbinayaa Guddoonka labada aqal ee BFS.
6. Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka wuxuu kaloo labada Aqal ee BFS u gudbinayaa soojeedimaha ku saabsan:

a. Shintiriska kulamada guud ee ladaba Aqal ay kaga doodayaan kuna ansixinayaan qodobbada dib-u-eegista dastuurka;
b. Mashruuc Sharci oo lagu ansixiyo natiijada wax-ka-beddelka Dastuurka.
c. Mashruuc kasta oo hortebin u leh wax-ka-beddelka dastuurka.

**Qodobka 4aad:**
**Marxaladda labaad:**
**ka doodista wax ka bedelka Dastuurka**

1. Soojeedimaha wax-ka-bedelka Dastuurka waxaa looga doodayaa cutub cutub ama qodobo ayadoo la raacayo jadwladka doodda.
2. Si waafaqsan Qaraarka BFS ee soo baxay 27 Luulyo 2015 ee xeerinaya habraaca loo marayo dib-u-eegista Dastuurka, Guddiga La socodka wuxuu u kala saarayaa: a) qodobo farsamo b) qodobo u baahan wada-xaajoodka siyaasadeed.
3. Si waafaqsan jadwalka doodda, xildhibaan kasta wuxuu qodobka/qodobada laga dooddayo fikradiisa ka dhiiban karaa hal mar, hadii aan gudoonku si kale u go'aansan, hadal-jeedintiisuna kama badnaan karto 10 daqiiqo, si waafaqsan xeerhoosaayda labada gole ee BFS, Q.31aad(6) ee xeer-hoosaadka Aqalka Sare, Q.88aad(3) & 78aad(3) ee xeer-hoosaadka Golaha Shacabka.
4. Muddada ay socoto dooddu, Guddiga la socodka oo kaashanaya Guddiga Madaxabannaan waxay ka jawaabayaan su'aalaha ka dhasha doodda xubnaha BFS ee la xiriirta qodobada wax ka bedelka lagu sameeyay.
5. Shir-guddoonku wuxuu xaqiijinayaa in ay idlaatay dooddu, wuxuuna ku dhawaaqayaa inuu ka gudbay marxaladda labaad.
6. Guddiga La-socodku wuxuu xaqiijinayaa in Guddiga Madaxabannaan uu qabtay hadal-qoraalka (minutes)-ka, codadka iyo muuqaallada la duubay si loogu daro soojeedimaha wax-ka-baddelka, loona keydiyo.

**Qodobka 5aad:**
**Marxaladda Seddexaad:**
**Codeynta iyo Ansixinta Soojeedimaha wax-ka-bedelka Dastuurka**

1. **Marxaladda Seddexaad** oo ah marxaladda codeynta iyo ansixinta soojeedimaha wax-ka-beddelka waxa ay ka bilaabanaysaa in loo qaybiyo nuqulka soojeedinta wax-ka-baddelka kama dambeysta ah xubnaha labada gole ee BFS, kaas oo lagu soo dhafay fiirooyinka iyo ra'yiga/aragtida ay xildhibaanada labada Gole soojeediyeen inta lagu guda jiray marxladda labaad, sidoo kalena lagu soo daray natiijooyinka latashiyada, aragtida iyo faalooyinka la xiriira qodobada u baahnaa heshiiska siyaasadeed ee lagu soo bandhigay marxaladda 2aad.
2. Dood kooban ayaa la sameenayaa, ayadoo mudnaan gaar ah la siinayo qodobada isbeddelka wax-ku- oolka ah lagu sameeyey.
3. Inta aan laga gudbin cutub/qodobo kasta, waxaa soojeedimaha wax looga beddeli karaa oo keliya; soojeedin ay Guddoonka labada Aqal soo gaarsiiyaan xubnaha Guddiga Dib u Eegista iyo La-Socodka Hirgelinta Dastuurka ama ugu yaraan lix meelood meel (1/6) tirada guud ee gole kasta ee BFS, ka hor 24 saacadood.
4. Guddoonku haddii uu u arko in:
   (a) Nuxurka soojeedintu khilaafsantahay nidaamka ama ka baxsantahay mowduuca qodobadda laga doodayo, wuxuu awood u leeyahay in soojeedinta (ama mooshinka) uu diido kuna celiyo xubnaha soo gudbiyay;
   (b) Haddiise codsiga soojeedinta uu oggolaado, wuxuu qoraalka soojeedinta wax ka beddelka u bandhigayaa kulanka wadajirka ah ee labada aqal, iyadoo horta loo codeynayo soojeedinta wax-ka-beddelka; haddii soojeedintu hesho

taageero aqlabiyad boqolkiiba kontan iyo hal dheeri ah (50%+1) tirada guud ee xildhibaanada labada gole ee BFS, waxaa toos loogu darayaa nuqulka kama dambeysta ah ee Dastuurka ee sugaya ansixinta; haddiise ay taageero weyso waxaa sidaas ku ansaxaya qormada asalka ah ee Baarlamaanka la horkeenay.

5. Cutub ama Qodobo kasta oo ka doodistiisu soo idlaato inta aanu u gudbin ansixinta kama dambeysta ah, wuxuu ku gudbayaa aqlabiyad boqolkiiba kontan iyo hal dheeri (50%+1) tirada xildhibaanada goobjooga ah ee codeynaya.
6. Guntanka kulamada wadajirka laba gole ee gaarka ah ee ku saabsan ansixinta soojeedimaha kama dambeysta ah ee wax-ka-bedelka dastuurka wuxuu ku qabsoomayaa in ay goobjoog yihiin saddex meelood labo meel (2/3) tirada guud ee xildhibaanada gole kasta BFS.
7. Soojeedinta wax-ka-beddelka kama dambeysta ee cutubyada dastuurka soo idlaaday, waxaa si kama dambeysa ah ku ansixinaya saddex meelood labo meel (2/3) tirada guud ee xildhibaanada Golaha Shacabka iyo saddex meelood labo meel (2/3) tirada guud ee xildhibaanada Aqalka Sare si waafqsan Qodobka 136 (1) ee Dastuurka KMG ah.
8. Qaabka codeyntu waxay noqonaysaa gacan-taag, qoraal iyo magac u yeeris muddada codeyntu socoto si waafaqsan Q.28(3.t) ee Xeer-hoosaadka Aqalka Sare & Q.31(5) ee xeer-hoosadka golaha shacabka.
9. Xubin kasta oo ka mid ah labada aqal waxaa waajib ku ah inuu ka qeyb qaato codeynta ansixinta dasturka mudada codeyntu socoto.

**Qodobka 6aad:**
**Meelmarinta Dastuurka**

1. Nuqulka Dastuurka uu ansixiyay BFS waxaa loo dirayaa meelmarinta Madaxweynaha JFS, wuxuuna dhaqangelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.
2. Dastuurka lagu soo saaray Faafinta Rasmiga ah waxaa goortii ay haboonaato oo daruufuhuna saamaxaan loo bandhigayaa shacbiga JFS si ay si kama dambeys ah ugu ansixiyaan afti dadweyne si waafaqsan Qod. 136(2).

**Qodobka 7aad:**
**Aftida Shacbiga iyo Dhaqangalka Dastuurka**

1. Dastuurka Cusub ee JFS wuxuu SI KU-MEEL-GAAR-AH U DHAQAN GELAYAA markii lagu soo saaro Faafinta Rasmiga JFS, wuxuuna dhaqan joogta ah yeelaaya markii lagu kordhiyo qodobada kasoo baxa heshiiska wadahadalka Soomaaliya iyo gobollada soomaaliyeed ee Somaliland, Shacbiguna si kama dambays ah ugu ansixiyo Afti Qaran.

**Qodobka 8aad:**
**Dhaqangalka Qaraarka Habraaca**

Habraacaan wuxuu dhaqangelayaa marka uu ansixiyo Barlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Muqdisho, / /2024